**AMARKA Lam. 9.**

**Abaabulka Maamulka D/hoose ee Muqdisho.**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIYA

## MAAMULAHA

KADIB markii la arkay shariga lamb.12 ee 8 Febarayo 1950;

KADIB makii laga baaran degey dekreetada Madaxweynaha Jambuuriyada Talyaaniga ee 31 Maarso 1950;

IYADOO la tixgeliyey aragtida in sare loo qaado ka qeyb galka bulshada dhulka ku nool howlaha maamulida ee ku jaan go'aan mabaa'diida Heshiiska Maamulka Walaayada ee Somaliya , waxaa loo baahday in laga ag dhiso Maamulka Dowladda Hoose ee magaalada Muqdisho hey'ada la tashi oo ka saacida Guddomiyaha howlahiisa adeegyada deeganka;

IYADOO la tixgeliyey araaga Golaha La Tashiga ee Qaraamada Madoobay;

IYADOO la tixgeliyey aaraaga Golaha Dulka Somaliya;

**WUXUU AMRAYAA:**

### Qod. 1

Maamulka Dowladaa Hoose ee magalada Muqdishu waxaa u xilsaaran Guddomiye oo uu Maamulaha Guud ku magacaabay dekreeto. Guddomiyhuhu wuxuu noqonayaa Sarkaal Dowladeed.

### Qod. 2

Guddomiyaha Dowladda Hoose waxaa la shaqeyn doono Guddiga Deegaanka oo ka kooban;

a) 6 qofood oo Somaali ah oo wakiil ka ah degmooyinka iyo xaafadaha magaladu ay ka kooban tahay;
b) hal qof oo Carab ah oo metelaaya bulshada Carbeed;
c) hal qof oo metelaayo dadka laga tira badan yahay;
d) 3 qofood oo metelaaya dadka Talyaaniga oo deggen halkaasi.

### Qod. 3

Wakiilada degmooyinka iyo xaafadaha ee magalada Muqdishu waxaa ay yeelan doonan kuraas laba jibaar ah intii horay Guddiga Deegaanka ugu qondeeyey waxaan laga soo sooci kara xubnaha Guddiga Deegaanka ama kuwo ka baxsan.

Kadib markii la tixgeliyey talooyinka Guddomiyaha deeganka waxa iyadana Guddomiyaha Gobolka uu kordhin doona kuraasta xubnaha kale eek u qoran xarafka b) e) iyo d).

### Qod. 4

Xubnaha Guddiga Deeganka waxaa lagu magacaabi doona Dekreetada ka soo baxda Maamulaha Walaayada, wax mushaar ah ma qaadan doonaan.

**Qod. 5**

Guddomiyaha Dowladda Hoose ayaa isugu yeeri doona kulamada xubnaha, kaas oo qaabka howsha guud iyo mid malmeedka ah ku wargelin doono.

Xoghayaha Deegaanka wuxuu ku shaqeyn doona sidii Xoghayaha dowladda Hoose.

**Qod. 6**

Haddi ay dhacdo in go'aan lagu gaari waayo 2 kal fadhi oo ugu yaraan 3 beri ay u dhexeysay, sababtoo ah in aysan buuxsamin tirada sharcigu qeeyayo in go'aan lagu gaaro, wuxuu Guddomiyaha Gobolku awood u leeyahay in go'aankaasi kala wareego.

**Qod. 7**

Xoghayaha dowladda hoose waxaa lagu magacaabi doona dekreeto ka soo baxda xafiiska Maamulaha Guud ee Walaayada.

Go'anadda Guddomiyaha waxay hirgeli doonaan kadib markii uu Xoghayaha oo uu taakuleeyo.

**Qod. 8**

Maamulka Dowladda Hoose ayaa si toos ah u qoran doono shaqaalihisa isagoo dhowraaya nidamka iyo xeerarka loogu tala galay.

**Qod. 9**

Guddiga Deeganka waxay talo ka bixin doonta arrimaha la xiriira maamulka adeegyadu oo uu Guddomiyuhu u baahdo.

Tala ay soo jeediso Guddiga Deeganku waa in la qaata xaddii ay khuseeyso arrimaha soo socda:

a) Misaanidada hordhaca ama iyo xisaabaadka kharajka;
b) Wax ka bedelidaa misaaniyadda hordhaca iyadoo weli isticmaalkiisa lagu dhex jiro;
c) Xeer nidaaminta la xiriirta adeegyaa iyo hey'adaha deegaanka;
d) Kharajyada ku xiran ilaa iyo 3 sano;
e) Kala bixinta ama ogolashaha hantida maguurtada ah ama kala bixinta hantida bulshada;
f) Dhismaha doonfuulka iyo xuquuqyada hantida;
g) Aqoonsifa iyo isticmaalka hantida maguurtada ah waqti ka badan 5 sano;
h) Maalgentia ka badan lacagta Sh.So. 5,000;
i) Ka qeyb galka heshiisyada amaahda;
l) Soo saarida canshuuraha iyo ganaaxyada;
m) Dacwooyinka taagan ama kuwaa la soo dhaafay oo qiimahoodu ka badan yahay Sh. So 5,000;
n) Hirgelinta mashaaric cusub amd dib-u-habeeyn qiimahoodu gaaraya Sh.So. 20,000 iyo Sh. So. 10,000 kiiba;
o) Qorshayaasha qandaraasyada shaqada ee qadar ka badan So. 10,000 / -;
p) Heshiisyada tartanka dhismaha oo ka sareeya Sh.So. 5000;
q) Heshiisyada dhismaha howlaha guud,
r) Qorshoyinka dib-u-habeynta;

**Qod. 10**

Aragtida Guddomiyaha Gobolku haddii ay ka soo horjeedu midda Guddiga Deegan waxa la faraaya in lagu diwaan geliyo arrinta galka warbixinnada ee lagu keydiiyo go'aanada.

**Qod. 11**

Go'aanada Guddomiyaha dowladda hoose waxay hoos imaan doonan aqbalidda Guddomiyaha Gobolka.

Go'aanadda la xirira arrimaha loo baahan yahay aragtida Guddonka Deeganka waa in ay wataan aragtidaasi.

Looma bahna in Guddomiyaha Gobolku uu aqbalo go'aanada la xirira fulinta go'aanada hore loo hirgaliyey ama khuseeya kharajyada dhisidda misaaniyada.

**Qod. 12**

Kadib markii uu ogaado Guddomiyaha Gobolka in aan la ansixi Karin go'aan sababo la xiriria dhinaca sharciga ama mudnaan waa in la ogeysiiyaa Guddonka iyadoo la tilmaamayo sababaha.

**Qod. 13**

Guddomiyaha Gobolku waa in uu aqbalaa ama diida ansixidda go'aanka muddo 30 beri ah laga bilaabo maalinti la hor geeyey. Muddadas kadib, haddii uusan wax xirir ah dhicin, go'aanadasi waxay noqon doonaa kuwa hirgalo haddi aanan loo baahan codsi gaar ee ansaxidda ama amar gaar ah.

Waxaa iska leh awood gaar ah Guddomiyaha Gobolka in dib loogu soo celiyo, haddii uu uu gar la noqoto go'aanadasi la xirira fulint go'aano horay loo aqbalay.

**Qod. 14**

Maamulaha Guud ayaa iska leh awooda ansixidda go'aanadda Guddomiyaha ee la xirira arrimaha ku qoran xarafyada a), b), c), d), e), i), l) q) r) ee qodobka 9.

**Qod. 15**

Go'aanada la xiriria arrimaha sare lagu xusay waxaa u soo diri doona Maamulaha Guud xafiiska Guddomiyaha Gobolka isagoo soo raaciyey aragtiisa Xafiiska Arrimaha Gudaha.

Haddii Maamulaha Guud ay la noqoto in go'aanku yahay mid aan la ansixi Karin sabbao sharci ama mudnaan, waxaa la wargelinaya Guddomiyaha iyadoo loo maraayo Guddomiyaha Gobolka, lana cadeeynaya asbaabaha kallifay.

**Qod. 16**

Go'aanada Guddomiyaha waxay hirgeli doonan oo keliya kadib markii uu Guddomiyaha Gobolka ama Mamulaha Guud ay ansixiyaan.

**Qod. 17**

Heshiisyadu ma noqon karaan kuwa la fuliyo haddii uusan marka hore la heli aqbalida Guddomiyaha Gobolka oo hubsaday in heshisyaadisa ay waafaqsan yihin fulinta go'aanadi la isku raacay iyo mashaaricda horay loo aqbalay.

Haddi ay soo if baxdo in go'aanada qaarkood ay ka muuqado dano gaar ahaaneed ee maamulka deegaanka ama aysan waafaqsaneyn danta guud ee bulshada Maamulaha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu joojiyo fulinta go'aanadaaasi dibna u ogeysiiyo maamulka deeganka in laga noqday.

**Qod. 18**

Cabashada go'aanada Guddomiyaha Degmada waxaa loo geyn kara Guddomiyaha Gobolka, go'aanada Guddomiyaha Gobolka waxaa logaga dacwoon kara Maamulaha Guud oo iska go'aanka kama dambeysta ah.

Dacwoyinkaasi waa in la horgeeya ciddii mudnaanta iska leh muddo 30 bari gudahooda laga bilaabo maalinta la soo saaray go'aankaasi ama amaraasi laga cabanaayo ama lagu faafiyey.

**Qod. 19**

Maamulaha Guud wuxuu ka dhigi kara wax kama jiraan waqti kasta kadib markii ay soo gaarto cabashada ama dacwada amase iskiisa baaritan ah go'aan ama amarrada Guddomiyaha haddi ay ka muqato in si qalad ah ama xadgudub awooodeed, ama sharciga ama xeer nidaamka guud ama gaarka ah amase ay ka soo horjeedaan danta guud.

**Qod. 20**

Maamulka Deeganka wuxuu leeyahay Keydka lagu aruuriyo go'aanada ama nidaam-sharciga loo baahan yahay in bulshada guud ahaan ay ogaadaan.

Muqdishu, 6 Juun 1951.

Maamulaha Guud
**Gorini**